State of Maine
Governor's Office of Policy Innovation and the Future
181 State House Station
Augusta, Maine
04333-0181

# Khudbaddeedii u Dambaysay ee Xaaladda Gobolka, Badhasaab Mills Waxa ay Soo Bandhigtay Ajandaha Qiimaha-La-Awoodi-Karo Waxana ay Ballanqaaday inay Dadka Reer Maine ka Difaacayso Xadgudubyada Maamulka Trump

*Badhasaab Mills waxa ay soo bandhigtay soo jeedin ah bixinta jeegag gargaar ah oo $300 ah, dhismaha guryo dheeraad ah, iyo sii waditaanka kuliyadda bulshada ee bilaashka ah waxana ay u sheegtay Maamulka Trump: "haddii aad doonaysaan inaad waxyeellaysaan dadka reer Maine, waa inaad aniga iga gudubtaan ugu horreyn."*

**Augusta, MAINE** - Khudbaddeedii ugu dambaysay ee Xaaladda Goboolka ee caawa, Badhasaab Janet Mills waxa ay tidhi "Iyada oo ay jiraan caqabadaha ina haystaa, haddana waxa aan aaminsanahay in xaaladda gobolkeenu ay xooggan tahay."

Iyada oo toos u abbaaraysa caqabadahaas, iyo siyaasadaha Maamulka Trump ee uga sii daraya xaaladda, Badhasaabku waxa ay soo bandhigtay Ajande Qiimaha-La-Awoodi-Karo ah oo loogu talagalay in lagu siiyo gargaar lacageed oo degdeg ah iyo xasillooni dhaqaale oo muddo-dheer dadka reer Maine.

> "Mid kamid ah caqabadaha ugu waaweyn ee haysta dad badan maanta - ha ahaado arday dhawaan ka qallinjebiyey jaamacadda, waalid dhallinyar ah, ama waayeel ku nool dakhli sugan - waxa weeyi kharashka nolosha ee sarreeya," ayaa ay tidhi **Badhasaab Janet Mills**. "Laga soo bilaabo daryeelka caafimaadka, guryaha iyo adeegyada guryeed illaa qiimaha gaadhiga xaajiyadda ah "pick up truck", raashinka iyo daawooyinka nolol-badbaadinta ah, kharashaadku waa kuwo aad u sarreeya- dadka reer Maine na, sida malaayiinka qof ee daafaha wadanka ku nool oo kale, waa ay dareemayaan. Caawa, waxa aan soo jeedinayaa in aynu wax ka qabano."

Ajandaha Qiimaha-La-Awoodi-Karo ee Badhasaabka waxa uu si gaar ah uga kooban yahay: 1) Jeegag Gargaar Ajandaha Qiimaha-La-Awoodi-Karo ah oo $300 ah oo la siiyo 725,000 oo dadka reer Maine ah si ay u noqoto tallaabo gargaar lacageed ah, iyada oo hannaanka loo marayaa uu la mid yahay hannaankii jeegagga gargaarka ee hore uu u qaybiyey Maamulkeedu; 2) Hindise guriyeyn "Riyada Ameerikaanka - American Dream" ah oo $70 malyan ah oo loogu dhisayo guryo ka qiime jaban kuwii hore dadka reer Maine isla markaana hoos loogu dhigayo qiimeyaasha guryaha ee sare, iyo; 3) inay ka dhigto barnaamijka kuliyadda bulshada ee bilaashka ah ee qaranku aqoonsan yahay mid joogto ah si loo xaqiijiyo in dhabbaha lagu raadinayo mihnad mushahar-wanaagsan oo Maine ah aan marnaba lagu kordhin carruurta doonaysa waxbarasho jaamacadeed.

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan Ajandaha Qiimaha-La-Awoodi-Karo ee Badhasaabka ayaa ku lifaaqan (PDF).

Ka Difaacidda Dadka Reer Maine Xadgudubyada Maamulka Trump

Khudbaddeeda, Badhasaabku waxa ay sidoo kale kaga hadashay korodhka ciidamada fulinta sharciga Federaalka ee Maine, iyada oo carrabka ku adkaysay in Maine aan la cabsi gelin dooonin lana aamusiin doonin.

> "Waxana aan u sheegayaa qofkasta oo aan halkan joogin, oo ay kamid yihiin saraakiisha Federaalku," **ayaa ay tidhi Badhasaa**bku, "haddii aad doonayso inaad waxyeellayso dadka reer Maine, waa inaad aniga iga gudubtaa marka hore."

Badhasaabku waxa ay walaac ka muujisay mustaqbalka Dimuqraadiyadda, iyada oo ka digtay in aynu ku jirno "wakhti halis ah oo taariikhdeena kamid ah - wakhti ay isla aragtida Maraykan lafteedu ay halis ku jirto" maadaama oo dawladda Federaalka ahi ay u adeegsanayso "awooddeeda xad-dhaafka ah inay ku cabsi geliso, ku ciqaabto, oo ku aamusiiso dadka ku dhiirrada inay dhalliilaan ama wax su'aalaan."

> "Dadka aan dan ka lahayn xadgudubyada maanta ee dawladda Federaalka, waxa aan keliya idin ka codsanayaa inaad ka fekertaan tan - maxaa dhacaya marka dawladda federaalku ay u aragto in adigu aad *tahay* mushkiladda berri?" **ayaa ay hadalkeeda kusii dar**tay. "Tani ma aha arrin xisbiyeed. Tani ma aha arrin khusaysa inaad tahay Dimuqraaddi, Jamhuuri, ama Mid Madaxbannaan. Tani ma aha arrin khusaysa inaad ku nooshahay gobol dimuqraadi ah, gobol jamhuuri ah, ama gobol isku jir ah - magaalo, xaafad ka baxsan magaalada, ama tuulo yar. Waa arrin khusaysa Mabaadi'da Maraykannimada ee Margaret Chase Smith - waa arrin khusaysa isla fekradda Maraykan lafteeda iyo mabda'a aasaasiga ah ee dhigaya in halkan

awooddu ay ka timaaddo dadka, halkan isku xukunka sharcigu uu gacan sarreeyo, halkan dhammaan dadka si isku mid ah loola dhaqmo oo ay u siman yihiin sharciga, oo halkan aynaan lahayn wax boqoro ah."

Iyada oo ay tani jirto, haddana Badhasaabku waxa ay sheegtay inay rajo qabto waayo "marka subuxu u muuqdo mid aad u fog, hal xiddig ayaa ka soo muuqata cirka taas oo iftiinkeedu inaga ilaaliyo inaynu ku ambanno mugdiga. Xiddigtaas Waqooyi ayaa marwalba inaga caawin doonta inaynu helno dhabbihii gurigeena. Xiddigtaas Waqooyina waa dadka reer Maine."

Qudbaddeeda, Badhasaabku waxa ay sidoo kale:

- **Ku baaqday in la helo daryeel caafimaad oo guud**, iyada oo tidhi, "Waxa daryeelka caafimaad ee wadankani dhab ahaan u baahan yahay ma aha taxane ah daaweyno caafimaad oo ku meelgaadh ah, balse waxa uu u baahan yahay qalliin weyn. Gobolna keligii ma awoodo, mana aha, in keligii lagu daayo in uu la daalaadhaco musiibadan qaran. Waayo daryeelka caafimaad waa xaq aadane. Waxa la gaadhay wakhtigii ay dawladda federaalku ay dhuumashada kasoo bixi lahayd isla markaana ay si toos ah wax uga qaban lahayd musiibada daryeelka caafimaad. Wax aan ahayn daryeel caafimaad oo guud lama aqbali karo."
- **Waxa ay ku dhawaaqday soo jeedin ah in taleefanada gacanta laga mamnuuco dugsiyada**: "Waxa aynu dhammaanteen ognahay in baraha bulshadu ay carqalad ku noqon karto maalin dugsiyeedka iyo caafimaadka maskaxeed ee dhallinyarta. Sidaas darteed waxa la gaadhay wakhtigii taleefanada gacanta laga saari lahaa fasalladeena. Caawa, waxa aan soo jeedinayaa in aynu dhaqangelino mamnuucidda taleefanka gacanta oo heer gobol ah inta lagu gudo jiro maalin dugsiyeedka - laga bilaabo gelitaanka illaa rawaxaadda - si loo yareeyo jeedsiga iyo carqaladda isla markaana niyadda carruurta loogu jeediyo waxbarashada. Marka taleefanada gacanta laga saaro fasallada, cilmibaadhis ayaa muujinaysa in waxqabadka ardaygu uu wanaagsanaado, natiijooyinka imtixaanku ay wanaagsanaadaan, habdhaqanku uu wanaagsanaado, imaanshuhu uu wanaagsanaado, isku-xidhnaanta bulsheedna ay wanaagsanaato."
- **Waxa ay ugu baaqday Maine inay sii waddo kala-duwista ilaheeda tamareed si wax looga qabto qiimeyaasha tamarta ee sareeya**: "Waxa Maine ay u baahan tahay in ay samayso waa inay sii waddo kala-duwista ilaheena tamareed anaga oo kusoo kordhinayna tamar nadiif ah oo dheeraad ah shabakadda si loo dhimo gaasta dabiiciga ah. Taasi waa sababta aynu usoo iibsanayno tamar nadiif ah oo ka qiime-jaban ta kale, sida ta dabaysha iyo cadceeda oo aynu ka helayno halkan Maine, iyo ta biyaha oo aynu ka helayno Canada, anaga oo ku dedaalayna keydka tamarta sidoo kale. Isla wakhtigaas, Efficiency Maine Trust iyo waaxdayda tamartu waxa ay diyaarin doonaan malaayiin doolar oo ah kharash-celin loogu talagalay kuleyilyeyaasha biyaha ee tashiilka sarreeya iyo sidoo kale bamamka biyaha, iyo ka-dahaadhidda-cimileed "weatherization" iyo casriyeynta tamareed ee kale -- waayo, ugu dambeyn, doolarka ugu wanaagsan ee laga keydiyo korontadu waa ka aan la kharash-gareyn."

Miisaaniyadda kabka ee Badhasaabka, taas oo aanay la socon doonin wax korodh cashuureed ah, waxa lagu baahin doonaa dhawrka toddobaad ee soo socda gudahood.

Marka laga yimaaddo soo jeedinada ay ku dhawaaqday caawa, Badhasaabku waxa ay sheegtay in kabka ay ku jiri doonaan maalgelin loogu talagalay casriyeyn ammaan oo lagu sameeyo basaska dugsiyada ee Maine kadib dhimashadii naxdinta lahayn ee ku timid labadii carruur ahaa ee Maine sanadkii hore; maalgelin loogu talagalay bixiyeyaasha adeegga daryeelka caafimaadka taranka ee Maine kadib qiime-jaris laxaad leh oo uu sameeyey Maamulka Trump; iyo maalgelin lagu dhaqangelinayo sharciga Red Flag ee ay ansixiyeen codbixiyeyaasha Maine Noofember 2025.